# CUDURKA

# QAAXADA

Developed by the
Minnesota Department of Health,
Tuberculosis Prevention and Control Program
August 2002 phone: (612) 676-5414

This is one in a series of four patient education pamphlets that addresses TB to be used in various clinical situations.

**Tuberculosis Disease, Somali**

Qaaxadu waa cudur qatar ah oo uu keeno jeermis ku tarma jirkaaga waxyeelayana xubnaha (tissue) jirkaaga. Inta badana waxaa uu ku dhacaa sambabada. Sidoo kale waa uu wax yeeleyn karaa qayb kasta oo jirkaada ka mid ah. Cudurka qaaxada wuxuu qof, qof kale ugu gudbiyaa hawada.

**Qaaxada waxay keentaa jeermis ku tarmi kara jirkaaga.**

## Waxyaalaha Lagu Garto Cudurka Qaaxada

Haddii ***Sambabadaadu*** qabaan cudurka qaaxada waxaa laga yaabaa in aad:

- qufac badan (yeelato)
- qufacdo xaako adag
- inaad qufacdo dhiig
- xabadka ku xanuuno markii aad qufacdo

Haddii sambabkaagu qaaxadu ku dhacday ama qayb kale oo jirkaaga ka mid ah, waxaa laga yaabaa in:

- misaankaaga hoos u dhaco
- qandho ku qabato
- aad habeenkii aad u dhidido
- meesha cudurka hayo oo aad kuu xanuunto

## Baaritaan lagu ogaanayo haddii aad qabto cudurka qaaxada

Dhowr baritaan ayaa laga yaaba in loo baahdo si loo ogaado in aad qabto cudurka qaaxada (iyo in kale).

***Tijaabada maqaarka (Mantoux skin test)*** waa habka kaliya oo lagu sheegi karo in aad qaaday jeermiska qaaxada. Baaritaankani waxaa inta badan lagu samaynayaa gacanta. irbad yar oo wadata daawo loo yaqaan tuubarkulin (tuberculin) ayaa waxaa lagaaga mudayaa maqaarka sare (ee dhudhunka gacanta dhankeeda hoose). Waxaa laga yaabaa in ay bararto ama casaato. Waxaa lagaa doonayaa in aad aragto takhtarkaaga labo ama saddex beri kadib si uu go'aansado natiijada baaritaanka. Haddii aad horay u qabtay talaalka qaaxada BCG wali waad qaadan kartaa tijaabada maqaarka (mantoux skin test). Talaalka BCG-du marwalba kama hortago qaaxada BCG-du iyo tijaabadu maqaarka (mantoux skin test) marwalba falga kama dhex dhaco.

***Raajada xabadka*** ayaa waxaa loo isticmaala in lagu arko jeermisku in uu wax yeelayey sambabkaagu iyo in kale.

Waxaa kale oo laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad ***xaakooto***, taas oo lagu baari doono sheybaarka si loo arko in jeermisku uu sambabkaaga ku jiro (iyo in kale).

## Ka hortagga qaaxada in uu ku fido dadka kale

Haddii uu sababkaagu qabo cudurka qaaxada, waxaad dadka kale u gudbin kartaa jeermiska qaaxada. Jeermiska qaaxada wuxuu ku fidaa hawada markii aad qufacdo, qayliso ama aad hindhisto. ***Afka ku dabool fasaleeti (ama tishiyu) markii aad qufacayso!*** Dadka kuu dhow waxaa laga yaabaa in ay neefsadaan jeermiska qaaxada uuna ka wareemo sambabada. Taa waxaa loo yaqaan jeermiska cudurka qaaxada keeno. Dadkaana waa in la baaraa si loo ogaado in ay qabaan jeermiska cudurka qaaxada keena ayna u baahan yihiin daawada ka hortagga inta uusan soo ridan cudurka qaaxada.

Jeermiska qaaxada kuma fido cunada, suxuunta dharka ama walxa kale.

Haddii uu cudurka qaaxada ka hayo qayb kale (oo aan ahayn sambabada,) waxay u badan tahay in aadan ku fidin karin jeermiska qaaxada dadka kale.

**Waa muhiim in aad sii wadaa dawadaada.**



Markii aad daawada qaadato dhowr todobaad oo aad raysato, ma aad fidin kartid jeermiska qaaxada. Waad ku laaban kartaa shaqadaadii iyo howlahaadii kale. Waa muhiim in aad u sii wada daawadaada sidii laguugu qoray si ay u cirib tirto jeermis qaaxada ee jirkaaga ku jira.